

## **XEER GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**SHARCI Lamb. 0 ee 21 Oktoober 1969**

**Dhismaha Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyada Dimuqratiga ee Somaliya**

### **MADAXWEYNAHA**

#### **GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Kadib markii la arkay Baaqa Kaacanka oo lagu siiyey Golaha Sare Kacaanka awoodaha sharci dejinta, fulinta iyo garsoorka.

Kadib markii la tixgeliye Dastuurka intiisa waafaqsan.

Kadib markii la garoowsaday in ku dhawaaqidda Jamhuuriyadda Dimuqratiga Somaliyeed, in la abuuro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somalia iyo habka lagu soo daabici doono.

Kadib markii lala tashtay Golaha Sare ee Kacaanka.

### **WUXUU XEEREEYEY**

#### **Qod. 1**

Waxaa la abuuray Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somalia oo lagu faafin doono shuruucda iyo xeerarka maamulka iyo qorallada kale eek a soo baxa Jamhuuriyadda.

#### **Qod. 2**

Amaradda lagu dabaaco Faafinta Rasmiga waxay hirgeli doonaan maalinta 15 ee ku xigta markii la faafiyey haddii aan si ka duwan loo dhigin.

#### **Qod. 3**

Ilsku dubaridka iyo dabacadda Faafinta Rasmiga waxay hoos imaan doonta Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka siiba qeypta Guddenka Qareenka Dowladda halkaas oo lagu keydin doonon qoraallada asalka ee xeerarka la dabaacay.

#### **Qod. 4**

Qiimaha iibka Faafinta Rashimda waa Sh So 5 nuqulkiisba.

Haddii aad rukun ka dhigatid qiimaha waa ShSo 100 dalka gudahiisa iyo Sh So 300 dalka dibediisa.

Lacagtaa runkunka ah waxaa ka mid ah canshuurta boostada oo dibedda noqon doono in diyaarad lagu soo diro.

Haddii la doonayo in wax lagugu qoro Faafinta Rasmiga qiimaha waa Sh. So 2 sadarkiiba.

Qorista Faafinta Rasmiga ah waa in la weydiista Guddoonka iyo Qormada xafiiska Faafinta kadib markii la dhiibo kharaj waajibka ah.

#### **Qod. 5**

Waxaa la buriyey xeer kasta ee ka soo horjeedo dekreetadani.

**Qod. 6**

Dekreetadani waxay hirgeli doonta 21 Oktoober 1969.

Muqdisho, 21 Oktober 1969

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

**SG Mohamed Siyaad Barre**